

Qowlka Xuquuqda Qofka Qaan-gaarka ah ee Daciifka ah
Vulnerable Adult Statement of Rights
Loogu talagalay isticmaalka CCRSS iyo ICF/IID (RHC)

Marka loo eego xeerka Cutubka 74.34 RCW, waxaad mudnaan adigu u leedahay inaad xor ka ahaato ka-tagitaanka, tacaddiga, ka faa'iideysiga lacageed iyo daayaca. Haddii ay jirto sabab aad ku aaminsan tahay inaad adigu la kulantay ka-tagitaanka, tacaddiga, ka faa'iideysiga lacageed iyo daayaca, adiga ayaa xaq u leh in:

1. Aad siiso warbixin Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS) iyo sharci fuliyeyaasha oo la wadaag macluumaad kasta oo aad aaminsan tahay inay aarinta la xiriiri karta baaritaanka, oo tilmaan qof kasta oo aad aaminsan tahay inuu hayo macaluumaad arrinta la xiriirta.
2. Aad xor ka noqoto argoosiga ku wajahan ka warbixinta ama u horseedka ka warbixin ka-tagitaan, tacaddi, ka faa'iideysi lacageed, ama daayac.
3. Laguula dhaqmo si sharaf leh oo lagugula hadlo luqada xurmayn leh.
4. Inaad hesho u waafajin macquul ah oo loogu talagalay naafanimadaada markaad ka warbixineyso, iyo muddada la baarayo arrinta iyo qaabsocodyada maamuleed.
5. Inaad weydiisato amar ka mamnuuca qof kasta oo adiga ka-tagay, ku tacaddiyay, ka faa'iideystay lacag ahaan ama ku daayacay inuu sii joogo gurigaaga, inuu adiga xiriir kula yeesho, ama inuu marin u yeesho lacagtaada ama milkiyaddaada. **Waxaan kuu diri doonaa urur adiga ku caawin kara.**
6. Inaad ka hesho macluumaad DSHS iyo u-diritaanno habboon oo ah hay'adaha kale ee kuu doodi, baari, ama ficil qaadi doona.
7. Inaad wax ka ogaato heerka baaritaanka, qaabsocoyada sharci, ficillada maxkamadeed, iyo natiijooyinka ay hesho hay'adda gacanta ku haysa kiis kasta oo aad adigu dhibbanaha tahay (iyada oo ka mid ah shuruudaha u dejisan sharciga).
8. Inaad weydiisato u-diritaanno loogu talagalay u-dooditaanka ama gacan-qabasho sharciyeed oo kaa caawisa qorsheynta amniga, baaritaannada iyo dhageysiyada. **Waxaan kuu diri doonaa adiga qaniimaadka habboon.** Eeg lambarrada taleefanka hoosta ku qoran.
9. Inaad ku cabato DSHS si rasmi ah ama aan ahaynba, ee ku saabsan baaritaannada ama qaabsocodyada sharci oo aad hesho jawaabo degdeg ah.

Inaad warbixin ka samayso tacaddi, ka-tagitaan, daayac, is-daayac ama ka faa'iideysiga lacageed, ama aad weydiisato amar badbaado, u wac:

Khadka Furan ee Cabashada ee Adeegyada Daryeelka Guriga

1-800-562-6078

Marin-u-Hel Codka / TTY (marka dhagaha wax laga qabo) 1-800-737-7931

Si aad ula xiriirto Disability Rights of Washington (Xuquuda Vaafanimada Washington) u wac:

1-800-562-2702

Xoojinta khadka Washington (TTY) ee laga helo tooska 711

Si aad ula xiriirtid Khadadka Cabashada ee Xafiiska Shaqaalaha la tacaala cabashooyinka Naafuoyinka Koriinka:

Codka: (833) 727-8900

Waxaa jooga turjubaano

TTY: Fadlan isticmaal 711 Adeega Xoojinta Washington